Advocates

Caring Partners. Creative Solutions. Better Lives.

Habdhaqannada Wargelinta Xogta Gaarka

Macluumaadkaaga.
Xuquuqahaaga.
Mas’uuliyadaheena.

Wargelinta waxay sharaxaad ka bixinayaa sida macluumaadka adiga kugu saabsan ee aan adiga kaa ururinno loo isticmaalayo iyo loo shaacinayo iyo sida macluumaadkan aad u heli karto. Fadlan si taxadir leh indhaha u mari.

Xuquuqahaaga	**Waxaad xaq u leedahay in aad:** • Hel nuqul ka mid ah diiwaangelintaada caafimaad oo xaanshi ku qoran ama iyadoo elektaroonig ah. • Sax diiwaangelintaada caafimaad oo xaanshi ku qoran ama iyadoo elektaroonig ah. • Codsashada xiriir isgaarsiin oo asturan. • Na soo weydiiso inaan xaddidno macluumaadka aan wadaagno. • Hel liistiga ay ku qoran tahay kuwa xogtaada aan la wadaagnay. • Hel nuqulka wargelinta asturan. • Dooro qof adiga ku matala. • Cabasho soo gudbi haddii aad aaminsantahay in xuquuqdaada khaaska ee asturan gef loo gaystay.	➤ ***Fiiri bogga 2aad iyo bogga 4aad wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqahan iyo sida xogta loo isticmaalo.***
Dooqaaga	**Waxaad jira dooq adiga aad haysato oo ah qaabka aan xogtaada u isticmaalno iyo kuwa aan la wadaagno inta aan:** • Go'aaminayna haddii aan xaaladdaada u sheegi karno qoyskaaga iyo asxaabtaada. • Gargaar mubiibo fidinayno. • Daryeel caafimaad dhimirka aan kuu fidinayno. • Adeegyadeena aan suuqgaynayno iyo iibinta xogtaada. • Deeq ururin.	➤ ***Fiiri bogga 5aad wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan dooqyadaada iyo sida xogta loo isticmaalo.***
Isticmaalkeena iyo Shaacinteena	**Waxaa dhici karta inaan xotaada u isticmaalno oo aan wadaagno inta aan:** • ku daweyneyno oo hay'addeena maaraynayno. • Biil u dirsanayno adeegga aan kuu qabanayno. • Wax ka qabanayno daryeelka caafimaadka bulshada iyo arrimaha ammaanka. • Daraasaad samaynayno. • U hoggaansamayno sharciga, dacwaddaha, iyo tallaabooyinka sharciga. • Ka jawaabbayno codsiyada ku deeqida unugga iyo xubnaha. • La shaqaynta baaraha caafimaadka ama maamulaha xarunta aaska. • Wax ka qabta magdhowga shaqaalaha sharci fulinta, iyo codsiyada kale ee dawladda.	➤ ***Fiiri bogga 6aad wixii xog oo dheeraad ah.***

Xuquuqahaaga

Marka ay timaado xogtaada caafimaadka, waxaa jira xuquuqo qaar oo adiga aad leedahay.
Qaybtani waxay kuu sharxaysaa xuquuqdaada iyo qaar ka mid ah mas'uuliyadaha ku saaran si ay wax kaaga caawiyaan.

Erayga “annaga” ee ku qoran Wargelinta Habdhaqanada Asturnaanta waxaa laga wadaa Advocates iyo shaqsiyaadka soo socda:

- Xirfadle kasta oo daryeel caafimaad oo loo ogolaaday inuu feelkaaga geliyo xogtaada caafimaadka.
- Daryeel bixiye kasta oo ka tirsan xubanaha shaqaalaha Advocates.
- Dhammaan xubnaha shaqaalaha Advocates, oo ay ku jiraan shaqaale, shaqaalaha, tabaruceyaasha, iyo shaqaalaha kale ee xarunta caafimaadka.

Hel nuqul ka mid ah diiwaangelintaada caafimaad oo xaanshi ku qoran ama iyadoo elektaroonig ah	• Waxaad waydiisan kartaa inaad aragto ama hesho nuqdi ka mid ah diiwaangelintaada iyo xogtaada kale ee caafimaadka ee aan adiga kaa hayno. Na weydii si sidan loo sameeyo. • Waxaan ku siin doonaa nuqul xogtaada caafimaadka ka mid ah ama mid kooban, inta badan 30 maalmood gudahooda laga bilaabo markaan helno codsigaaga. Waxaa dhici karta inaan kugu soo dalacno kharash macquul ah, oo ujro ku salaysan.
Na weydiiso inaan saxno qoraalka diiwaangelintaada caafimaadka ku qoran	• Waxaad na waydiin kartaa inaan saxno xogtaada macluumaadka ee aad u malaynayso inay khaldan yihiin ama wax ka dhiman yihiin. Annaga na weydiiso si sidan loo sameeyo adiga oo nagala soo xiriirayo xogta ku qoran bogga dambe. • Waxaa dhici karta in codsigaaga aan “maya” dhahno, laakiin waxaan kuugu sheegi doonaa sababta oo qoraal ah 60 maalmood gudahood.

Codsashada xiriirrada isgaarsiin oo asturan	• Waad na weydiisan kartaa inaan kugula soo xiriirno nidaam gaar ah (tusaale ahaan, sida teleefanka guriga ama xafiiska) ama boosto ka duwan aan kaala soo xiriirno. • Codsiyada macquulka ah oo dhan “haa” ayaan uga jawaabbaynaa.
Na weydiiso inaan xaddidno waxa xogtaad aan u isticmaalayno ama aan wadaagayno	• Waxaad na waydiisan kartaa inaanan isticmaalin ama wadaagin macluumaadka caafimaadka qaarkood ee daawaynta, xogta lacag bixinta, ama hawlaheena qaar. Annaga la nooga baahna inaan codsigaaga ku raacno, waxaana laga yaabaa inaan dhahno “maya” haddii daryeelkaaga ay saameynayso. • Haddii aad si buuxda aad u bixiso lacagta caymiska ee adiga kugu soo aado ee ku baxa adeeg ama daryeel caafimaad, waxaad na waydiisan kartaa inaanan macluumaadkaaga la wadaagin uljeedo lacag bixinta ama hawlahayaga caymiskaaga caafimaadka. “Haa” ayaan leenahay aysan ka ahayn haddii uu sharciga nagu farayo mooyee inaan xogtaada wadaagno.
Hel liistiga ay ku qoran tahay kuwa xogtaada aan la wadaagnay	• Waxaad naga codsan kartaa liistiga (tirada) inta jeer ee xogtaada caafimaadka aan wadaagnay ilaa lixdii sano ee la soo dhaafay laga bilaabo taariikhda aad na soo waydiisatay, iyo sababta. • Waan ku dari doonaa dhammaan xogta aan bixinnay oo dhan marka laga reebo xogta ku saabsan daaweynta, lacag-bixinta, iyo hawlaha daryeelka caafimaadka, iyo qaar ka mid ah xogta kale (sida mid kasta oo aad naga codsatay inaan samayno). Sanadkiiba hal jeer ayaan tirada si bilaash ah kugu siin doonaa laakiin waxaan ku dallici doonaa kharash macquul ah, kharash ku saleysan haddii aad mid kale soo codsato 12 bilood gudahood inta lagu jiro.

Hel nuqulka wargelinta asturan	• Wakhti kasta ayaad waxaad soo codsan kartaa nuqul warqad ah oo wargelintan ah, xitaa haddii aad ogolaatay inaad si elektaroonik ah ku hesho wargelinta. Isla markiiba nuqul warqad ah ayaan kuu fidin doonaa.
Dooro qof adiga ku matala	• Haddii qof awood qareennimo aad siisay ama haddii qof aad mas'uul sharci ka dhigatay, qofkaas ayaa isticmaali kara xuquuqdaada oo uu wax ka dooran karo xogtaada caafimaadka. • Waxaanu hubin doonaa in qofku uu awood u leeyahay inuu adiga ku matali karo ka hor inta aanaan wax tallaabo ah qaadin.
Cabasho Gudbinta haddii aad dareento in lagu xadgudbay xuquuqdaada	• Cabasho ayaad soo gudbin kartaa haddii aad dareento in xaquuqdaada lagu xadgudbay adiga oo la soo xiriirayo: **Sarkaalka Advocates Chief Compliance Officer** **1881 Worcester Road** **Framingham MA 01701** Waxaad cabasho u soo gudbin kartaa Waaxda Adeegyada Aadanaha Iyo Caafimaadka ee Xuquuqda Madaniga ah adiga oo warqad u diraya U.S. Department of Health and Human Services Office for Civil Rights 200 Independence Avenue, SW, Washington, DC 20201, wac 1-877-696-6775, ama booqasho **www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/complaints/.** • Kaaga aargudsan meyno dacwad aad naga gudbisay.

Dooqaaga

Xogta caafimaadka qaarkood, waxaad noo sheegi kartaa kala doorashadaada ku saabsan waxa aan wadaagno.

Haddii aad si cad u door bidayso sida aan u wadaagno xogtaada xaaladaha hoos ku xusan, nala soo xiriir. Noo sheeg waxa adiga aad rabto inaan sameyno, oo tilmaamahaaga waan raaci doonaa.

Xaaladahan marka ay jiraan xuquuqna waad leedahay kala xulashana waad leedahay labaduba ee waxa aad noo sheegto:	• La wadaag macluumaadka qoyskaaga, asxaabtaada kuu dhow, ama dadka kale ee daryeelkaaga ku lugta leh. • La wadaag xogta xaalad gargaar ee musiibo. *Haddii aadan awoodin inaad noo sheegto dookhaaga, tusaale ahaan haddii aad miyir daboolan tahay, waad noo sheegi kartaa si aan wadaagno xogtaada haddii aan aaminsanahay haddii tan ay dan kuugu jirto. Sidoo kale xogtaada waxaad la wadaagi kartaa marka loo baahdo si loo yareeyo ee ay jirto khatar ku wajahan caafimaadka ama badbaadada.*
Xaaladahan markay jiraan anaga *marna* xogtaada cidna la ma wadaagno aysan ka ahayn haddii ogolaansho qoraal ah aan kaa hayno maahane:	• Ujeedooyin suuqgeyn. • Iibin macluumaadkaaga. • Inta badan wadaaga qoraalada teraabiyada ama daweynta hadalka.
Haddii ay tahay dhaqaale ururin:	• Waxaa dhici karta inaan kula soo xiriirno dadaallada dhaqaale ururin marka ay jiraan, laakiin waxaad noo sheegi kartaa inaanan mar dambe kula soo xiriirin.

Isticmaalkeena iyo Shaacinteena

Sidee baan u isticmaalnaa ama u wadaagnaa macluumaadkaaga caafimaad?
Caadiyan waxaan xogtaada caafimaadka u isticmaalaa ama u wadaagnaa siyaabaha soo socda.

Daawayntaada	Waan xogtaada caafimaadka u isticmaalnaa oo aan ula wadaagnaa xirfadlayaasha kale ee adiga ku daweynaya.	***Tusaale ahaan:*** *Takhtar adiga kaa daaweynaha dhaawac ayaa dhakhtar kale wax ka waydiinaya xaaladdaada caafimaad.*
Hawlaha Socodsiinta Rugteena	Xogtaada caafimaadka waxaan u isticmaali karnaa oo wadaagi karnaa si aan u socodsiino rugteena, si daryeelkaaga aan u wanaajino, oo adiga ana kula soo xiriirno marka ay duruuri tahay.	***Tusaale ahaan:*** *Waxaan xogtaada caafimaadka u isticmaalkaa waxyaabo ku saabsan caafimaadkaaga si aan u maareyno daawayntaada iyo adeegyadaada.*
Biil u dirsanayno adeeggaaan kuu qabanaynyo	Waxaan xogtaada caafimaadka aan u isticmaali karnaa oo wadaagi karnaa si aan u soo dalacno oo aan lacag uga helno caymisyada caafimaadka ama hay'adaha kale	***Tusaale ahaan:*** *Waxaan xogta xogtaada adiga kugu saabsan aan siinaa shirkaddaada caymiska caafimaadka si si ay u bixiyaan lacagtada adeegyadaada.*
Adiga lagula soo soo Xiriiro	Xogtaada caafimaad waxaa laga yaabaa inaan u isticmaalno si aan kula soo xiriirno macluumaadka ku saabsan daawaynta iyo tilmaamaha daryeelka dabagalka ama xogta ku saabsan adeegyada aanu bixino.	***Tusaale ahaan:*** *Waxaa laga yaabaa inaan kula soo xiriirno ballamaha la qorsheeyay ama la baajiyay, diiwaangelinta ama cusbooneysiinta caymiska, arrimaha biilasha ama lacag bixinta, qiimeynta nidaamka hore, sahannada qanacsanaanta ama natiijooyinka imtixaanka.*

Sidee kale ee aan u isticmaalnaa ama u wadaagnaa macluumaadkaaga caafimaad?

Waxaa naloo ogolaaday ama nalooga baahan yahay in xogtaada aan u wadaagno siyaabo kale – badiyaa siyaabaha wax ku kordhinaya danta guud, sida caafimaadka dadweynaha iyo cilmi-baarista. Waa inaan buuxinaa shuruudo badan oo sharciga ah ka hor inta xogtaada ujeedoyin kale aanan la wadaagin. Wixii macluumaad dheeraad ah firi: **www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/index.html**.

Wax ka caawinayno arrimaha caafimaadka bulshada iyo arrimaha ammaanka	Xogtaada caafimaadka waan wadaagi karnaa marka ay jiraan xaalado qaarkood sida: • Kahortag xanuun. • Wax ka qabanaya dib u soo celinta badeecadaha. • Ka warbixinta falcelinta xun ee daawooyinka. • Ka warbixinta xadgudubyada la tuhmo, dayacaadda, ama rabshadaha qoyska dhexdiisa ka dhaca. • Ka-hortagga ama dhimista khatarta halista ah ee ku wajahan caafimaadka ama badbaadada qof kasta.
Daraasaad samaynayno	Sidee kale ee ayaan u isticmaalnaa ama u wadaagnaa xogtaada caafimaadka. Badanaaba, xogta adiga kugu saabsan la ma shaacinayo ka hor inta aan la wadaagin; haddii taasi aysan suurtagal ahayn, macluumaadka waxaa kaliya lala wadaagi doonaa ogolaansho wargelin marka ay jirto kaliya.
U hoggaansanaanta sharciga	Waxaan xogta adiga kugu saabsan aan wadaagi doonaa haddii sharciyada gobolka ama federaalku ay u baahan yihiin, oo ay ku jirto Waaxda Adeegyada Aadanaha Iyo Caafimaadka haddii ay rabaan inay arkaan inaan u hoggaansameyno sharciga asturnaanta ee federaalka.
Ka jawaabbayno codsiyada ku deeqida unugga iyo xubnaha jirka	Waxaan xogta caafimaadka adiga kugu saabsan aan la wadaagi karnaa ururrada ku boorinta xubnaha.
La shaqaynta baaraha caafimaadka ama maamulaha xarunta aaska	Xogta caafimaadka waan la wadaagi karnaa baaraha dhimashada, baaraha geerida, ama maamulaha aaska marka shakhsigu dhinto.

Marka ay jiraan codsiyo magdhowga shaqaalaha sharci fulinta□iyo codsiyada kale ee dawladda	Waxaan xogta caafimaadka ee adiga ku saabsan aan u isticmaalnaa ama u wadaagaynaa: • Sheegashada magdhawga shaqaalaha. • Ujeedooyinka waaxda sharci fulinta ama sarkaalka fulinta sharciga. • Hay'adaha kormeerka caafimaadka ee hawlaha sharciga amrayo. • Shaqooyinka gaarka ah ee dawladda sida militariga, amniga qaranka, iyo adeegyada ilaalinta madaxtooyada.
Ka jawaabcelinta dacwadaha iyo tallaabooyinka sharciga ah	Waxaan xogta caafimaadka ee adiga kugu saabsan la wadaagi karnaa si aan uga jawaabno amar maamul ama maxkamad, ama ka jawaabista amar maxkamadeed (ilaa aan heerar adag oo gobolku khusayn ka hortagga siidayntaas).

Guud ahaan waxaan ku weydiin doonaa ogolaanshahaaga oo qoran ama amarka qaaliga ka hor inta anaan wadaagin xog xasaasi ah ee adiga kugu saabsan sida:

- Diiwaanada Isticmaalka Khamriga iyo Muqaadaraadka. Fadlan waxaad oggaataa in sharciga iyo qawaaniinta federaalku ay ilaaliyaan asturnaanta xogta ciladda isticmaalka maandooriyaha ee diiwaangelinta bukaanka socodka. Xeerarka iyo qaanuunnada dowladda federaalka wuxuu ku qoran yahay bogga 10 ee qoraalka wargelintan. Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad si taxadar leh dib indhaha u mariso.
- Xogta la xiriirta xanuunka AIDS, ARC ama HIV-ga, oo ay ku jiraan balse aan ku koobna oo kaliya sugnaanta ama natiijooyinka baaritaanka, iyada oon loo eegin in natiijadu tahay in qofka laga helay ama laga waayay.
- Cudurrada Galmada Lagu Kala Qaado.
- Natiijooyinka Baaritaanka Hiddaha Sidaha.
- Ogolaanshaha ilmo soo Ridista.
- La-talinta Dhibbanaha ee Rabshadaha Guriga ama Weerar Galmo la Xiriira.
- Dukumentiyada Daweynta Hadalka ah qaarkood.
- Xiriirka lala yeesho Daryeel Bixiyeyaasha Caafimaadka Dhimirka iyo Shaqaalaha Bulshada.

Mas’uuliyadaheena

- Anaga sharciga ayaa wuxuu nooga baahan yahay inaan ilaalino xogta shaqsiga u gaarka ah iyo amniga xogtaada caafimaadka ee dhowarsan.
- Si degdeg ah ayaan kuu ogeysiin doonaa haddii ay dhacdo in ay baxsato xog ay dhici karto in la jabsado taas oo laga yaabo inay wax u dhimeyso asturnaanta xogta u gaarka ah shaqsiga ama amniga macluumaadkaaga.
- Waa inaan raacnaa waajibaadka iyo habdhaqanka asturnaanta xogta ee wargelintan lagu qeexay oo aanna ku siinaa nuqul wargelinta ah.
- Ma isticmaali doono ama ma na wadaagi doono xogta ayna ka ahayn sida halkan lagu sharaxay aysan ka ahayn haddii qoraal aad noogu soo sheegto maa hane. Haddii aad noo soo sheegto in aan yeeli karno, wakhti kasta waxbaad ka bedeli kartaa. Qoraal noogu soo sheeg haddii ay wax iskaa bedelaan.

Wixii macluumaad dheeraad ah firi:
www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/index.html.

Muddo ilaa intee baan haynaynaa xogtaada?
Xogta caafimaadka waxaan ku keydinnaa qaab warqad, elektaroonik, ama qaab sawir ah waxaanan keydinnaa ilaa 20 sano ka dib marka lagaa saaro ama daaweynta kama dambaysta ah. Diiwaannada kale waxaa la hayaa si waafaqsan sharciga gobolka iyo federaalka ama xeerarka. Nuqul ka mid ah hab-raacyadayada sii haynta ee diiwaannada caafimaadka ayaa la heli karaa marka la soo codsado.

Isbeddellada Shuruudaha Wargelinta
Anaga waan bedeli karnaa shuruudaha wargelintan, isbedeladuna waxay khuseeyaan dhammaan macluumaadka aan kaa hayno. Wargelin cusub waxaa la heli karaa marka la soo codsado, xafiiskeena, iyo boggeena interneetka lagu soo diro.

Cabashooyin
Haddii aad aaminsan tahay in xuquuqdaada adiga gaarka kuu ah lagu xadgudbay, cabasho ayaad noo soo dirsan kartaa ama waxaad casbasho u dirsan kartaa Xoghayaha Waaxda Adeegyada Aadanaha Iyo Caafimaadka ee Maraykanka. Si cabashada anaga aad noogu soo dirto, Sarkaalkeena

Cabashada kala soo xiriir 1881 Worcester Road, Framingham, MA 01701 ama **CCO@Advocates.org**. Dhammaan cabashooyinka oo dhan waa in qaab qoraal ah loo soo diraa. Sarkaalkeena Asturnaanta Xogta, waxaa laga soo xiriiraa karaa 877 296-5432, wuxuuna kaa caawin doona inaad qorto cabashadaada, haddii kaalmadaan aad soo codsato. Kaaga aargudsan meyno dacwad aad naga gudbisay.

Nagala soo Xiriir

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan Wargelinta Habdhaqanada Asturnaanta fadlan la xiriir:

Advocates Chief Compliance Officer
Telefoon: 877-296-5432
Iimeelka: **CCO@Advocates.org**

Codsiyada diiwaannada caafimaadka la xiriir:

Records Center
1881 Worcester Road
Framingham, MA 01701
Telefoon: 508-628-6300
Iimeelka: **RecordsCenter@Advocates.org**

Taariikhda wargelinta ay dhaqan galayso waa waa Febraayo 21aad, 2024.

Diiwaangelinnada Xogta Asturan ee Daawaynta Isticmaalka Walxaha Muqaadaraadka

Xuquuqdaada iyo Xulashooyinkaaga: Asturnaanta daawaynta isticmaalka walxaha muqaadaraadka ee bukaan socodka ee dhowrsan waxaa ilaalinaya sharciga iyo qawaaniinta dawlada dhexe. 42 USC § 290dd-2, 42 USC 290ee-3, iyo 42 CFR Qaybta 2 (Qaybta 2). Xeerka Qaybta 2 wuxuu qorayaa dhowris adag oo federaali ah marka loo eego sharciyada kale ee gaarka ah ee caafimaadka iyo, marka laga reebo xaddidan, waxay u baahan tahay ogolaanshaha bukaanka si loo shaaciyo macluumaadka caafimaadka ee la ilaaliyo xitaa ujeedooyinka daaweynta, lacag bixinta, ama hawlaha daryeelka caafimaadka. Sii dayn kasta ee xogta ah oo lagu bixiyo ogolaanshahaaga qoran waxa ka mid noqon doona wargelin kasta oo dheeri ah ee xogta waa la mamnuucay ilaa si cad oo qoraal ah loogu soo gudbiyo ogolaanshahaaga ama sida kale ay u ogolaato xeerka Qaybta 2. Haddii aad rabto inaad noo ogolaato inaan xogtaada xasaasiga ah la wadaagno daryeel bixiyeyaal kale ama hay'ado ka baxsan manfacyada isku-duwidda daryeelka, waxaad saxiixi kartaa foom ogolaansho ah oo qeexaya cidda aan u sheegi karno.

Isticmaalka iyo Daah ka qaadista Waxaa loo Fasaxay: Fadlan waxaad oggaataa in sharciga federaalku ayaa noo oggolanayo in aan shaaca ka qaadno diiwaannada daawaynta isticmaalka walaxda maandooriyaha adiga oo aan ogolaansho qoraal ah kaa haysan xaaladahan soo socda:

- Sida waafaqsan heshiis lala galo urur adeeg oo u qalma/xiriir ganacsi.
- Shaqaale aqoon u leh cilmi-baarista.
- Ulajeedooyin dabagal xisaabeed ama qiimayn barnaamij.
- Si looga warbixiyo dembi gudaha ah barnaamijka Advocates ee Qaybta 2 ama ka dhanka ah shaqaale kasta oo u doodaha oo u shaqeeya mid ka mid ah barnaamijkeena Qaybta 2 ee ku xadgudubka maandooriyaha ama barnaamijyada khamriga.
- Shaqaalaha caafimaadka ee xaaladdo caafimaad oo deg degga ah ku jira.
- Maamulka ku haboon ee gobolka ama deegaanka si ay uga warbixiyaan xadgudubka ama dayaca ilmaha looga shakisan yahay.
- Marka la raacayo amar maxkamadeed.

Marka ay timaado xaalad qalalaase, waxaa laga yaabaa in xogta qofka u gaarka ah la jabsado si loo hubiyo ammaankaaga. Xaalad kasta, waxaa dhici karta in xogta kaliya la shaarciyo ilaa inta loo baahan yahay.

Waxaa muhiim ah in la xuso in la ogaado in waqti ka waqti laga yaabo inaad aragto Shaqalaha Advocates ee Barnaamijka ku tagrifalka maandooriyaha ama khamriga (Qaybta 2 Shaqaalaha Barnaamijka) oo meel baan ah aad ku aragto. Shaqaalahayada Qaybta 2 kuu ma soo dhowaan doonaan inta ay joogaan fagaaraha dadweynaha. Si kastaba ha noqotee, haddii aad ku aragto xubin ka tirsan Shaqaalaha Barnaamijka Qaybta 2 meel fagaare ah oo aad rabto inaad la hadasho, waxaa laga yaabaa inaad la xiriirto iyaga oo khatar u ah inaad jebiso barnaamijka asturnaanta.

Soo Sheegista Xadgudubka: Fadlan ogow ku xad-gudbida sharciga dowladda federaalka iyo xeerka Qaybta 2aad waa dambi, oo cidii ku xadgudubtana waxaa dhici kartaa sidan soo socota:
Xadgudub kasta oo loo geysto xeerka Qaybta 2 aad ayaa laga yaabaa in la soo sheego:

- Wicida Khadka tooska ah ee u Hoggaansanaanta ee aan la Shaacinayn ee Advocates (877) 296-5432
- Sarkaalka Xogta Gaar ah ee Advocates: privacyofficer@advocates.org
- Ku socota United States Attorney, United States Attorney’s Office John Joseph Moakley U.S. Courthouse (Xeer Ilaaliyaha Mareykanka, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Mareykanka John Joseph Moakley Maxkamadda Mareykanka)
- One Courthouse Way, Suite 9200, Boston, MA 02210, ATTN: Kaaliyaha Qareenka (Garyaqaanka Waajibka ah).
- Ku socota xafiiska mas’uulka ka ah ee Maaraynta Adeegyada Caafimaadka Dhimirka iyo ku Tagrifalida Walxaha (SAMHSA) (Substance Abuse and Mental Health Services Administration (SAMHSA) office)
- la socoshada barnaamijka daaweynta mukhaadaraadka xanuun bi'yeyaasha ee: Sarkaalka Addeecista Barnaamijka Daaaynta ee Mukhaadaraadka Xanuun Bi'yeyaasha kala xiriir
- Xarunta SAMHSA ee Daawaynta Ku Tagrifalka Maandoorayaha (CSAT) ee **866-BUP-CSAT** (866-287-2728) ama **infobuprenorphine@samhsa.hhs.gov**.

Qiritaanka Wargelinta Habdhaqanada Asturnaanta

Aniga oo hoosta saxiixaya, aniga oo ah, (*magaca qofka loo adeeggo*) _____, waxaan qirayaa in aan helay nuqul (copy) ah (*magaca rugta*) _____' Wargelinta Habdhaqanada Asturnaanta ayaa hadda dhaqangal ah. Waan akhriyay oo waan fahmay shuruudaha Wargelinta waxaanan fursad u helay inaan waydiiyo su'aalo ku saabsan isticmaalka ama shaacinta macluumaadka caafimaadkayga.

_____

Saxiixa Shaqsiga/Wakiilka Shaqsiga loo Adeeggay (haddii uu quseeyo)

_____

Taariikhda

_____

Far wa wayn ku Qor Magaca Wakiilka Shaqsiga

_____

Xiriirka ka Dhaxeeya Qofka loo Adeeggay

QEYBTAN XAFIISKA KALIYA AYAA ISTICMAALAYA

Wargelinta Habdhaqanada Asturnaanta ee la siiyay qofka (*taariikhda*)_____ **qaabka:**

- ☐ Kulanka fool-ka-fool ah
- ☐ Boostada
- ☐ Iimeel
- ☐ Qaab kale: _____

Awoodi waayay in la helo ogolaansho qoraal ah iyo qirasho sababtoo ah:

- ☐ Qofka/Wakiilka Sharci waa loo dhiibay diiday inuu saxiixo
- ☐ Xaqiijin rasiid iimayl
- ☐ Qaab kale: _____

Magaca iyo Shaqaalaha Darajada: _____

Saxiixa Shaqaalaha: _____

Taariikhda: _____

****

Foomka faylka ee diiwaanka